Xirfadaha Shaqada

Waxaad gaari kartaa:

- Khibrad Gacan-kuqabasho ah
- Adeegsasho Fiican Oo Kombuyuutarka Ah
- Erey bixino Caafimaad
- Xirfado Wada xiriir
- Qoraal Xirfadaysan
- Maareynta Waqtiga

Tababar

Qaar kamid ah tusaalooyinka tababarka:

- Tiknoolajiyadda Ganacsiga
- Xirfadaha Caafimaadka
- Ganacsiga Warshadaha
- Ganacsiga Baabuurta
- Naqshadaynta boggaga internetka iyo Barnaamijta Kombuyuutarka
- Adeegaha Banii'aadamka iyo Bulshada

Noqo **madaxa**xooga lehee qoyskaaga. Tusi caruurtaada **awooda** ay leedahay **waxbarashada** iyo doorashooyinka wanaagsan ee ay keento.

Qaybta Adeegaha Bulshada

Economic Services Administration

PO Box 45440

Olympia, WA 98504-5440

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

DSHS 22-1579 SM (11/14)

Lacag bixinada Waxbarashada!



Kala hadal maamulahaaga kiiska WorkFirst waxyaabaha kusaabsan doorashooyinkaaga waxbarashada.

Washington State Department of Social & Health Services

Transforming lives

Sideen kuheli karaa shaqo wanaagsan?

Iskuulka oo aad aadid hal sanno waxay kusamayn kartaa noloshaada farqi weyn. Shahaado hal sanno ah waxaad kuheli kartaa shaqo aad kuqaadatid lacag kugu filan oo aad kudaryeeshid qoyskaaga.

Barnaamijyada waxbarashada waa kuwo laheli karo si laguugu caawiyo in aad heshid shaqada aad doonaysid. Haddii aad qaadatid Caawimaada Kumeel gaarka ah ee loogu talogalay Qoysaska Baahan (TANF), waxaad kaqayb qaadan kartaa fasalada lacag la'aanta ah kuwaas oo kugu caawin doona in aad heshid shaqo. Barnaamijyada aad kuheshid shahaado, iyo shaqo, waa kuwo kujira gudaha Qorshahaaga Masuuliyada Qofka (IRP). Kulliyadaha degmada waxay kugu caawin doonaan in aad codsatid caawimaad maaliyeed oo aad ugu baahnaan karto barnaamijyo kale.

Mahaysatid miyaa weli dibloomo ama shahaado dugsiga sare ah ama mid guud oo dhiganta? Waan kugu caawin karnaa middaas, waana tallaabada koowaad ee lagu heli karo shaqo aad kutaakulayso qoyskaaga.

Madanaynaysaa waxbarasho?

Lahadal maamulahaaga kiiska WorkFirst si aad u oggaato haddii ay waxbarashadu noqon karto mid kamid ah Qorshahaaga Masuuliyada Qofka (IRP).

Sideen kuheli karaa lacag baddan?

Sii wad waxbarashadaada marka aad shaqaynaysid si aad kore ugu qaadid dakhligaaga. Helida waxbarashada aad u baahantahay si aad u noqotid qof isku filan waa tallaabada koowaad ee aad kugaari kartid ahdaaftaada nolosha.

Cathy mashaqaynin labbo sanno mana aadin iskuul muddo tobban sanno ah. Maadaama ay tahay hooyo haysata labbo caruur ah waxay aad ugu dadaalaysay in ay dib ugu noqoto iskuulka, laakiin waxay oggayd in ay tahay qaabka keliya ee ay kuheli karto shaqo kawanaagsan mushaarka hooseeya ee ay hada qaadato.

Cathy waxay dhammeysatay Shahaado Maamulka Ganacsiga ah middaas oo ay kuqaadatay kulliyada degmada bulshadeeda hal sanno ayada oo qaadanaysay deeqda Caawimaada Kumeel gaarka ah ee loogu talogalay Qoysaska Baahan si ay ugu caawiso qoyskeeda.

Hadda Cathy shaqadeedu waa wakiil ceymiska ah. Waxay kasbataa lacag kufilan oo ay kucaawiso qoyskeeda ayada oo aan qaadan Caawimaada Kumeel gaarka ah ee loogu talogalay Qoysaska Baahan.

Cathy waxay sii wadataa waxbarashadeeda ayada oo shaqaynaysa. Fasalada ay Cathy kuqaadatay shahaadadeeda waxaa lagu codsan karaa in ay dhammeyso darajada Maamulka Ganacsiga.

Maxay yihiin noocyada shaqo ee la igu tababarayo?

Kulliyad kasta waxay leedahay barnaamijyo tababar oo loogu talogalay shaqooyinka laga heli karo deegaankooda. Laxiriir kulliyadaada deegaanka si aad u oggaato barnaamijka adiga kugu habboon midka uu yahay. Qaar tusaalooyin ah oo kusaabsan barnaamijyada tababarka ee laga helo deegaanka waxay yihiin:

- Wax Alxamid
- Shahaadada Caawiyaha Kalkaalisada (NAC)
- Tiknoolajiyadda Kombuyuutarka
- Caawiye Caafimaad
- Caawiye Caafimaadka Ilkaha
- Waxbarasho Marxalada Hore Ee Caruurnimada Ah
- Maamulka Ganacsiga
- Xiriirin Warbaahin Kaladuwan
- Cadaalada Dembiga
- Xisaabin
- Baabuur Xagaajin
- Makiinad wax kusameyn